



ISU DIYAARI BAABUR WADISTA CIMILADA JIILAALKA



Hubso saadaasha cimilada iyo warbixinta gaadiidka inta lagu jiro duufaanaada cimilada jiilaalka. Tilmaamahani waxay kaa caawin karaan inaad is diyaarisid ka hor inta aadan safrin.

Dayactirka Baabuurka Waqtiyada Jiilaalka

- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Inta cimiladu aanay xumaan, hubso in baabuurkaaga si habboon looga shaqeeyey loona dayactiray. Hubso siistemyada korontada, freenka, beetariyada, nalalka, masaxayaasha muraayadda, siistemyada dhalaaliya-barafka iyo kulaylinta iyo qaboojinta in xaalkoodu fiican yahay. | <input type="checkbox"/> Hubso in baabuurkaada leeyahay qalabka safarka cimilada jiilaalka sida dhar diiran oo dheeraad ah, buste, badiil yar, carrp ama xaano aan isku dhagin, nalalka gurmada, alaabta dhalaalinta barafka, silsiladaha lugaha baabuurta, iyo baraf xaaqaha. |
| <input type="checkbox"/> Hubi lugaha baabuurkaada – aad ayey muhiim u yihiin. Si wanaagsan u buufi lugaha baabuurka habsana inay leeyihiin girgirro ku filan. Horay u qorsheeyso – iibiyayaasha lugaha baabuurka waa kuwa ugu mashquulsan ka hor iyo inta lagu jiro duufaanaada jiilaalka. | <input type="checkbox"/> Marka heerkulku hoos u dhaco, ugu yaraan bar ka bar buuxi haanti shidaalka baabuurkaada; shidaalka dheeraadka ahi wuxuu dhimaa dhadada laga yaabo in ay tubada shidaalka ku cabburiso baraf kaddibna joojiyo matoorka cimilda qabaw. |
| <input type="checkbox"/> Isticmaal liiska hubinta Take Winter By Storm Checklist si aad u diyaarsatid agabka gurmada baabuurka, oo ay ku jiraan raadiyaw, karbuuno, beetariyo dheeraad ah, agabka gargaarka degdegga ah, macluumaadka xidhiidhka gurmada, biyo, iyo cuntada aan isbeddelin. Waxaad liis faahfaahsan ka heli kartaa bogga internetka TakeWinterByStorm.org . | <input type="checkbox"/> Hubso in baabuurkaada si dhamaystiran loo dayactiro waqtiyada loo qabto si aad uga dheerato dayactirrada qaaliga ah, u yarayso soosaarista CO2, una dhaqaleysato shidaalka. |
| | <input type="checkbox"/> Qaado silsiladaha lugta baabuurka hubsona inay si fiican ula'eg yahiin lugaha baabuurka. |

Waxyaabaha Dheeraadka Ah Ee Loo Baahan Yahay in aad Ku Haysato Gudaha Baabuurkaada*

- | | |
|---|--|
| <input type="checkbox"/> Biyaha la Qaato <ul style="list-style-type: none"> • Afar, dhalooyinka 16da waqiyad qofkiiba maalintii (in badan baddal) | <input type="checkbox"/> Iftiinka gurmada iyo seenyaalaha cad ee baabuurta kuwasoo la dhigo jidka dhiniciisa (toobinta, saddex geeslaha) |
| <input type="checkbox"/> Cuntada Aan-Halaabin <ul style="list-style-type: none"> • Gabal gabalka cuntada fudu ee sida sahlan loo furo, isku darka fruttada qalalan iyo looska, buskud | <input type="checkbox"/> Nalka ammaanka/iftiinka bililigleeya |
| <input type="checkbox"/> Agabka gargaarka degdegga, oo ay ku jiraan dawooyinka qofka | <input type="checkbox"/> Agabka <ul style="list-style-type: none"> • Ku dar kalbadaha la badbadali karo, kashafiitada leh qeybaha la badbadali karo (siman, laba jibbaaran, Filibis), dubbe, xadhigga jiidmada, sharooto |
| <input type="checkbox"/> Toosh iyo beetariyo dheeraad ah | <input type="checkbox"/> Dhalaaliyaha barafka ee loogu talagalay baabuurta |
| <input type="checkbox"/> Kaadhka Xidhiidhka Gurmada <ul style="list-style-type: none"> • Dhig meesha aad dhigtid macluumaadka caymiska gaadiidka | <input type="checkbox"/> Baraf xaaqaha |
| <input type="checkbox"/> Musaafir kasta dharka uu qaato waqtiyada jiilaalka <ul style="list-style-type: none"> • Qaado koodhadh, buudh, koofiyado, gacmo-gashiyo iyo/ ama cimaaamad oo la siiyo musaafar kasta – wax kasta oo siiya diirimaad hadday u baahdaan inay ka baxaan baabuurka | <input type="checkbox"/> Fiilooyinka beetariga lagu kiciyo |
| <input type="checkbox"/> Siidhi lagu dalbado caawimo | <input type="checkbox"/> Badiil yar iyo qalabka baabuurta lagu jiido (carro, xaanada aan isku dhagayn, silsilado) |
| <input type="checkbox"/> Waxyaabaha kululeeya gacmaha | <input type="checkbox"/> Warqad, qalin iyo khariidadaha deegaanka (oo muujiya waddooyinka safarka) <ul style="list-style-type: none"> • Hadday khasab noqoto inaad ka tagto baabuurkaada, hubso inaad kaga tagto qoraal dadka kale u sheegaya qorshayaashaada socdaalka |
| <input type="checkbox"/> Bustela siiyo musaafar kasta | <input type="checkbox"/> Buuxiyaha tilfoonka gacanta iyo/ama beetari dheeraad ah |
| <input type="checkbox"/> Qalabka roobka | <input type="checkbox"/> Tuwaalada dila jeermiga, jawaanada khashinka iyo xadhkaha blastiigga ee loo isticmaalo nadaafadda qofka |

*Si aad u heshid liis tafatiran oo ku saabsan aqabka is-diyarinta qofka ee baabuurkaada, booqo bogga internetka TakeWinterByStorm.org.



Baabuur Wadista iyo Socdaalka Jiilaalka. Baabuur wadista marka cimilada fiican tahay waa iska adag tahay. Laakiin marka lala kulmo cimilada daran, waxaa muhiim ah inaad qaadato taxadarro dheeraad ah.

- Haddii cimilada xun la saadaaliyo, hubi saadaasha ka hor intaanad bixin, isku habee qorshayaashaada socdaalka haddaad karto. Haddii la saadaaliyo cimilo xun, ka fikir inaad dib u dhigto safarkaaga.
- Ka taxadar biyaha fadhiya, kuwaasoo keeni kara sabbayn, xasusnawna in barawfka uu horaanta ku xargago buundooyinka iyo buundooyinka mara kore, markaa si taxadar leh u qaabil iskana ilaali isbeddelada lama filaanka ah ee ku dhaca jihada.
- Ha isticmaalin nalalkahore ee waaweyn ee baabuurka. Araggu inta badan waxaa saameeya xaaladaha cimilada jiilaalka. Habeen ama maalin, nalalka baabuurka waa inay shidnaadaan lana daaraa nalalkahore ee hoose.
- Ka shaqaysii masaxayaasha. Waa iska caddahay, soo ma aha? Laakiin hubi in masaxayaashaada la beddelo lix bilood ilaa laba iyo toban bilood kasta si si fiican ay ugu shaqeeyaan.
- Baabuurka ha ku wadin moolka biyaha fadhiya ama ha ka wareeganin calaamadaha waddada xidhan – biyuhu waxaa dhici karta inay ka qoto dheer yihiin intaad u malaynayso. Baabuurta lagu dhex wado biyaha fadhiya waa sababta ugu horeysa ee keenta dhimashada daadka la xidhiidha. Sidoo kale, daadku wuxuu qarir karaa halista burburka waddadaama khadadka korontada aasan. U hoggaansan calaamadaha xidhnaashaha ilaa biyuhu dhammaadaan, jidkana si badbaado leh dib loo furo. Ka soo noqo. Ha ku qarqamin!
- Haddii biyo soo butaacay keenaan in biyuhu sare u kacaan agagaarka baabuurkaaga, ka tag baabuurka una dhaqaaq meel sare haddaad si badbaado leh sidaas sameyn karto. Adiga iyo gaadiidkaba si dhakhso ah ayay biyuhu idin qaadi karaan. Gaar ahaan aad u taxadar marka aad socdaalayso habeenkii!
- Marka dhulka baraf yaalo, ha socdaalin ilaa ay khasab noqoto. Joogista guriga ayaa badbaado kuu ah adiga iyo dadka kale. Hadday khasab tahay inaad socdaasho, hubi jidadka xidhitan ee deegaanka, iskuna day inaad sawirto khadka ugu badbaadada badan ee ugu shilka yar.
- Markaad socdaalayso, ka taxadar halista barafka, gaar ahaan waddooyinka hadhaysan, buundooyinka ama meelaha sare uu barafka fadhiisto.
- Hadday tahay inaad socdaasho, ku ekaaw jidadka waawayn oo safar adoo diyaarsaday dhar diiran oo dheeraad ah, buste, badiil yar, carro ama xaanada aan isku dhagayn, nalalka gurmada, alaabta lagu dhalaaliyo barafka, silsiladaha luqaha baabuurta, iyo baraf xaaqaha.
- Intaanad bixin, kordhi aragga adoo hubinaya daaqadahaaga iyo muraayaduhu inaanay baraf lahayn – ku shid AC-gu si uu ugu ilaaliyo ceeryaamada inta aad baabuurka waddo.
- Inta ay jirto dabaylaha xooggan, dibadda fiiri. Dibadda ka fiiri khashinka duulduulaya, isticmaalna taxadar dheeraad ah markaad u dhawdahay baabuurta isjiidda, kuwa qafilan, ama baabuurta lagu qaado xamuulka fudud. Baabuurta qaar waa inaan la wadin. Waxaa ugu fiican inaan la kaxayn baabuurta isjiidda, mid qafilan, iyo baabuurta “heerka sare” waqtiyada dabaysha xooggan tahay.
- Markaad baabuurka ku waddo cimilada daran, tartiib u soco kana fogaaw masaaf weyn baabuurka kaa horeeyo. Waxay qaadataa in badan in la joojiyo jidadka qoyan ama barafka leh, markaa baddalkii aad ka dambayn lahayd sida caadiga ah 3-4 sekan baabuurka kaa horeeyo, ka dambee 8-10 sekan. Baabuurta waawayn waxay ku qaadataa inay joogsadaan in badan.
- Baabuurta ku dhaqaaqada aftarta lugo iyo kuwa ku dhaqaaqo dhamaan lugaha uma joogsaan ama leexdaan si fiican xaaladaha barafka leh marka loo eego kuwa ku dhaqaaqa labada lug.
- Markaad baabuurka ku waddo jidh leeman badan xaaladaha barafka soo dhaco ama fadhiyo, ku sugnow leenka ugu nadiifsan kana dheeraw leen beddelka aan lama-huraanka ahayn. Hubso inaad isticmaasho calaamadaha kuu tilmaama jihada markaad beddelayso leenka si aad u muujiso waxa aad damacsan tahay.
- Leexinta iyo qabashada freenka aad ayey u adag yihiin jidadka barafka leh. Leexi shukaantada adiga oo si taxadir leh oo siman dhaqaaqiya. Iska ilaali in aad si degdeg ah u qabato freenka taasoo keeni karta inaad lumiso kantaroolka. Adoo isticmaalaya freenka aan isxerin, saar cadaadis, joogto ah oo sugan freenka cagta la saaro. Hadday khasab kugu tahay inaad qaado tallaabo ka leexasho si aad isaga ilaaliso in aad ku dhacdo shay, waxaa ugu fiican hadday suurto gal tahay inaad ka leexiso baddalkii aad qaban lahayd freenka.
- Haddii baraf ku qabsado, toosi lugaha baabuurka si tartiib ahna u sii shidaalka si aad isaga illaliso wareegga lugaha. Hadday ammaan tahay inaad baabuurka ka baxdo, isticmaal iftiinka gurmada si aad ugu digto baabuurta kale in aad meesha joogto, waxaadna carro ku shubtaa lugaha baabuurka hoostooda ama isticmaal badiilkaada si aad uga soo gurto barafka. Haddii lugaha baabuurka sii wadaan inay wareegaan adna ka dhaqaaqi karin meesha, ha ka bixin baabuurka. Daar big-biglaxaashaada gurmada iyo dirso tilfoon si aad u hesho caawimo.
- Marka aad baabuur ku waddo cimilada daran ee jiilaalka, aadna ku timaado baabuurka dayactirka jidka, hoos u dhig xawaaraha kana bax jidka si aad u siiso barxad badan oo ka caawiso inay baneyaan jidka. Haddaad ka dambayso baabuur dayactira jidka, halkaagaa dambe iska joog ilaa ay ammaan tahay inaad gudubtaa. Waxay leeyihiin arag xaddidan inta ay shaqada ku jiraan.
- Aayar soco kana taxadir in badan agagaarka meelaha lagu xero ama laga saaro silsiladaha. Waxa jira inta badan dad ka soo baxa baabuuradooda.
- Hadday khasab kugu tahay inaad ka tagto baabuurkaaga xilli lagu jiro duufaanka barafka, ka fogee baabuurka jidka intii suurto gal ah sida ugu ammaanka badan si aad isaga ilaaliso in aadan xayirin baabuurta kale iyo qalabka xaaqidda barafka.
- Hadday khasab kugu tahay inaad kasoo baxdo baabuurkaaga jidka dhiniciisa xilli cimiladu daran tahay, isticmaal sharootada soo celisa iftiinka ama nalalka billilgileeya si ay si fiican kuu arkaan baabuurta gudbayaa.
- Inta lagu jiro xilliyada barafka fadhiya ama soo dhaca, waxaa dhici karta in adeegga Gaadiidka lagu leexiyo waddo kale, baajiyo, ama dib loo dhigo. Ogaaw waddada barafka uu maro baska, laakiin filo dib dhacy. Ka raadi websaydada jadwalka Gaadiidka cimilada jiilaalka iyo liiska warbixinta Gaadiidka Dadwaynaha adiga oo booqda TakeWinterByStorm.org.